

Goobaha Baska Weyni Joogsado Ee Barafka Loogu Tala-galay Iyadoo Dugsi Ahaan Loo Eegayo: Shaxda

Shaxda ku lifaaqan waxaa ku qoran goobta dugsiga PPS ka tirsan ee helaysa adeega guud ee baska isla markaana LAGA YAABO in ay yeelato wado barafka loogu talagalay oo leh goob la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay - marka wadooyinka barafka loogu talagalay ay lagama maarmaanka yihiin. Goobaha dugsiyada qaarkood malaha adeega guud ee baska ama uma baahna wadooyinka barafka loogu talagalay.

Haddii aad maqasho ogaysiin ah in PPS ay marayso "Wadooyinka Barafka Loogu Tala-galay" markaa isticmaal shaxda soo socota si aad u ogaato haddii aad u baahan tahay in aad isticmaasho goob la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay isla markaana wadadaadu marayso meel la marayo oo baraf ka jiro.

Haddii aad aragto cinwaanka goobtaada caadiga ah ee aad joogsato oo ku qoran tiirka (column) ku dhuxaala shaxanka ee *Sharaxaada Goobta Caadiga ah ee Basku Joogsado (Regular Bus Stop Description)* markaasi fiiri cinwaanka lagu qeexay ee ku qoran tiirka (column) ee *Sharaxaada Goobta Basku Joogsado Ee Loogu Talagalay Barafka (Snow Bus Stop Description)* si aad u ogaato haddii aad leedahay goob la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay oo la isticmaalayo marka PPS ay marayso "Wadooyinka Barafka Loogu Talagalay". Wakhtiyada basku joogsanayo si ula kac ah ayaan loogu qorin shaxannada sababtoo ah si joogta ah ayuu wakhtigoodu isku beddelaa.

Haddii aad leedahay goob basku joogsado oo loogu talagalay barafka fadlan wakhtiyada la joogsanayo wadadaada barafka loogu talagalay ka hubi website-ka PPS. Wakhtiyadani si joogta ah ayay isku beddelaan.

<http://www.pps.net/bus>

Haddii aadan lahayn "Wado Barafka Loogu Talagalay" markaa isticmaal wadadaadii iyo caadiga ahaa ee aad joogsan jirtay

Ardayga dhigata Waxbarashada Gaarka ah ee isticmaasha baska yar ama adeegyada gaadiidka gaarka ah waxaa si toos ah loo ogaysiin doonaa darawalka aad leedahay. Macluumaadka hawada xumaata ee adeegyada SE waxaa sidoo kale laga heli karaa halkan.

<http://www.pps.net/Page/2237>

2016-2017

Macluumaadka Hawada Xumaata ee loogu tala-galay PPS ee Gaadiidka Guud ee Wadooyinka uu Maro Basku Iyo Goobaha Basku Joogsado

KU SOCOTA: Waalidiinta ama Mas'uuliyiinta ardayda isticmaalaysa adeega baska.
Ka socota: Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) Xafiiska Gaadiidka Ar-dayga.

RE: Macluumaadka Goobta Adeega Basku Joogsado ee Barafka loogu talagalay ee Sanad Dugsiyeedka 2016-2017-ka.

Qoraalkani wuxuu sharraxyaya sida Degmadu jawaab u bixin doonto inta lagu guda jiro hawada xumaatay iyo sida **laga yaabo** in adeegaaga baska weyn ay u saameeyaan barafka, biyaha barafka noqda, ama xaaladaha hawada ee aan wanaagsanay ee kale.

Ardayga dhigata Waxbarashada Gaarka ah ee isticmaasha baska yar ama adeegyada gaadiidka gaarka ah waxaa si toos ah loo ogaysiin doonaa darawalka aad leedahay. Macluumaadka hawada xumaata ee adeegyada SE waxaa sidoo kale laga heli karaa halkan. <http://www.pps.net/Page/2237>

Wadooyinka uu basku maro oo dhan uma baahna goob la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay inta lagu jiro hawada xumaatay. Qoraalkani wuxuu kaa caawin doonaa in aad ogaato **haddii** baskaagu maro wado barafka loogu talagalay iyo haddii aad leedahay goob la joogsado oo beddel ah oo barafka loogu talagalay. Qoraalkani waxa kale oo uu bixin doonaa macluumaad ku saabsan sida loo helayo farriimaha warbaahinta iyo nidaamyada la raacayo ee hawada xumaata ee PPS

Macluumaadka la cusboonaysiyyay ee wadooyinka barafka loogu talagalay, goobaha basku joogsado, iyo wakhtiyada, iyo sidoo kale, macluumaadka la cusboonaysiyyay ee wadada caadiga ah, goobaha basku joogsado, iyo wakhtiyada, waxaa laga yaabaa in halkan laga helo: <http://www.pps.net/bus>

Isbeddel Muhiim ah. Wadooyinka barafka loogu talagalay waxaa loo qoondayn karaa in ay shaqeeyaan SUBAXDII ama FIIDKII ama labadoodaba iyadoo ay ku xiran tahay xaaladaha wadada ama saadaasha hawada. **Fadlan si dhow ula soco ogeysiyyada Degmada oo dheeraad ah inta lagu jiro maalintii kuwaasi oo loogu talagalay isbeddelada.** Go'aanada Degmada ee la gaaray markii hadalkii hore lagu dhawaaqay ka dib waxaa cusboonaysiin la xiriirta hadalkaasi lagu samayn doonaa isla warbaahintii laga baahiyay.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah, fadlan wac ama email u dir.

Si Daacadnimo leh,
Teri Brady, Agaasimaha Gaadiidka Ardayga

GAADIIDKA ARDAYDA
716 N.E. Marine Drive • Portland, OR 97211
503-916-6901 • Fax-ka: 503-916-2707
transportation@pps.net



ALTERNATE EMERGENCY SNOW ROUTE STOPS

Paradas de emergencia para las rutas alternas cuando nieva

當下雪的時候校車站更換

Sẽ có những trạm ngừng khẩn cấp khác khi trời tuyết

Альтернативные остановки на маршрутах школьных автобусов, в случае неожиданного выпадения снега

GOOBO KALE OO DARUURI AH OO UU ISTAAGI DOONO BASKU

ENGLISH

This information is very important. If you are unable to read it, please have someone explain it to you in a language you understand, or contact your school.

SPANISH

Esta información es muy importante. Si usted no es capaz de leerlo, por favor obtenga a alguien que se lo explique en un idioma que usted pueda entender, o llame al 503-916-3582.

RUSSIAN

Эта информация очень важна. Если вы не можете прочитать это, пожалуйста, попросите кого-нибудь, чтобы вам объяснили это на родном языке или вы можете позвонить по телефону 503-916-3583.

VIETNAMESE

Tài liệu này rất quan trọng. Nếu quý vị không đọc được tài liệu này, xin vui lòng nhờ người quen giải thích bằng ngôn ngữ mà quý vị có thể hiểu được, hoặc gọi điện thoại số 503-916-3584.

CHINESE

這些資訊是很重要的。如果你不懂得它的英文意思，請找某人用你瞭解的語言為你解釋，或打電話 503-916-3585。

SOOMAALI

Macluumaadkan aad buu muhim u yahay. Hadii aadan akhrin Karin, fadkan raadso qof kuugu faahfaahiya luqad aad fahmayso, ama la xidhiidh dugsigaaga 503-916-3586.

Dugsiyada Dadweynaha Portland wey aqoonsan yihiin kala duwanaanshaha iyo qiimaha ay leeyihiin dadka oo dhan iyo kooxaha iyo doorka ay ku leeyihiin bulshada. Dhammaan dadka iyo kooxaha oo dhan waxaa loola dhaqmi doonaa si caddaalad leh marka ay noqoto dhammaan hawlahaa, bar-naamijyada, iyo hawlgalada, iyadoo aan la eegaynin da'ada, midabka, caqiqada, naafanimada, xaalada guur, dalka laga soo jeedo, jinsiyada, diinta, lab ama dhigid ama dookha galmo. Guddiga Siyasadda Waxbarashada 1.80.020-

Isbeddel Muhiim ah. Wadooyinka barafka loogu talagalay iyo goobaha beddelka ah ee la joogsanayo waxaa lagu dhawaaji doonaa SUBAXDII ama FIIDKII ama labadoodaba iyadoo ay ku xiran tahay xaaladaha wadada ama saadaasha hawada. Fadlan si dhow ula soco ogeysiisyada Degmada oo dheeraad ah inta lagu jiro maalintii kuwaasi oo loogu talagalay isbeddelada. Go'aanada Degmada ee la gaaray markii hadalkii hore lagu dhawaqaay ka dib waxaa cusboonaysiin la xiriirta hadalkaasi lagu samayn doonaa isla warbaahintii laga baahiyat.

- Ku dhawaaqidda wadooyinka barafka loogu talagalay waxaa laga yaabaa in ay weheliso furitaanka wakhti dambe la furayo, iyadoo la isticmaalayo wakh-tigii caadiga ahaa ee la furayay, ama xiritaan wakhti hore la xirayo .
- Ardayda waxaa laga codsanayaa in ay basaska ku suaan masaafu ammaan ah oo wadada ka shishaysa inta lagu jiro xaaladaha hawadu xumaato.
- Suurtagal maaha in ay jiraan wakhtiyoo sax ah oo meesha la joogsanayo inta lagu jiro xaaladda degdega ah ee maalmaha barafku da'ayo iyadoo ay ugu wacan tahay hawada xumaatay oo dib u dhac u keenta isku socodka gaa-diidka. Waalidiintu waa in ay go'aan ka gaaraan marka ama haddii ay maalmahani carruurtooda u dirayaan goobaha basku joogsado. Waalidiintu waa in ay hubiyaan in ardayda si sax ah u labistaan maalmahani.
- Waalidiintu waa in ay carruurtooda u tilmaamaan socodka badbaadada leh iyo nidaamyada sugitaanka la xiriira.
- Waalidiintu waa in ay carruurtooda u tilmaamaan socodka badbaadada leh iyo nidaamyada sugitaanka la xiriira.
- Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinaya in ay qaataan go'aan shakhs oo la xiriira imaanshaha ardaygooda ee dugsiga inta lagu jiro xaaladaha hawadu xumaato, gaar ahaan ilmaha barbaarinta ku jira 'preschooler', ardayda dug-siyada hoose ee laga yaabo in uu saameeyo dib u dhac ku yimaada, wakhti dheer oo ay safar galaan, ama cabsida shakhsiyeed la soo deristo.
- Marka ay dhacdo in ay PPS ku dhawaaqdo in 2 saacadood oo dib loo dhigay furitaanka maalin uu dugsigaaga jadwalka gashaday in ay noqoto maalin Dib loo dhigayo Furitaanka, dugsigaaga wuxuu bilaabmi doonaa 2 saacadood ka dib wakhigaagii caadiga ah ee dawanka/jalasku dhici jiray – maaha 2 saacadood ka dib wakhigaaga dib loo dhigay furitaanka. Tusaale haddii wakh-tigaagii caadiga ahaa ee dawanka/jalasku dhici jiray uu yahay 8:00 SUBAX-NIMO, oo uu jadwalkaaga wakhtiga dambe ee la bilaabayaa uu yahay 10:00 SUBAXNIMO, oo ay degmadu ku dhawaaqdo 2 saacadood oo dib loo dhigay furitaanka iyada oo ay la xiriirto hawada xumaatay dugsigu wuxuu bilaabmi doonaa 10:00 SUBAXNIMO.
- Basaska waxaa ku rakiban raadiyaha la iska hadlo waxayna sidoo kale ku qalabaysan yihiin taayirada cimilooyinka kala duwan oo dhan loogu talagalay iyo silsilado. Wadayaasha basaska waxaa loo tababaray in in ay go'aan fiican ka qaataan marka loo baahan yahay silsiladaha taayirada lagu xiro iyadoo ay la xiriirto xaaladaha kala duwan ee hawada.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan nidaamyada Gaadiidka Ardayga ee PPS, waxyaalahu cusub, wadooyinka barafka loogu talagalay ama meelaha la joogsado ee barafka loogu talagalay fadlan la xiriir Gaadiidka Ardayda 503-916-6901 ama email u dir transportation@pps.net.

Ogaysiiska Hawada Xumaata & Nidaamyada La Raacayo

Helitaanka War Degdeg ah – Dakhso ah

Ogeysiisyada PPS ee hawada xumaata la xiriira ee xiritaanka ama dib u dhaca waxaa la helaa iyadoo la adeegsanayo warbaahin badan. PPS waxay ka shaqaysaa sidii ay wararka degdeg ah si dakhso ah oo wax ku ool ah u gaarsi-in lahayd qoysaska. Sida aanu u samayno:

- Nidaam wicitaan telefoon oo iswada: Oo Ingiriisi ah iyo luqaddo la taa-geerayo oo loo dirayo lambarka rasmiga ah ee ku qoran foomka diiwaan gelinta ardayga. Waad beddeli kartaa lambarka telefoonka adigoo ogaysi-inaya xoghayaha dugsigaaga.
- Internet-ka oo la soo geliyo: halka ay ku qoran tahay “alert pod” ee www.pps.net iyo dhammaan website-yada dugsiyada.
- Twitter: Follow us [@PPSConnect](https://twitter.com/PPSConnect) wixii degdeg ah iyo wararka kale ee degmada la xiriira
- Facebook: Like us www.facebook.com/pps.homepage
- Fariinta la isugu diro telefoonka: Isku diiwaan gelinta fariin dirista ee loogu talagalay Fariin Qaadaha Dugsiga adigoo fariin ku diraya HAA una diraya 68453
- PPS hada ka dib ma isticmaalayo nidaamka ‘Flash Alert’.

Marka ay dhacaan dib u dhacyo ama xiritaan la xiriira degmooyinka ku hareeraysan, sharci ahaan warbaahintu, ma soo bandhigi doonaan wax fariin ah haddii PPS ay furan yihiin. Tani waxay noqon kartaa dhibaato marka ay bulshada bilowdo in ay su'aal ka keenaan waxyalaaha ka dhacaya PPS. Telefishanka iyo raadiyayaasha ayaa bixin doono ogeysiisyo; fadlan telefoon ha u dirin xafiisyada maamulka.

Fadlan si dhow ula soco ogeysiisyada Degmada oo dheeraad ah inta lagu jiro maalintii kuwaasi oo loogu talagalay isbeddelada. Go'aanada Degmada ee la gaaray markii hadalkii hore lagu dhawaaqay ka dib waxaa cusboonaysiin la xiriirta hadalkaasi lagu samayn doonaa isla warbaahintii laga baahiyay.

Ogaysiiska Hawada Xumaata & Macluumaaadka

Goob kasta oo basku joogsado iyo wadada la marayo dib ayaa loo eegay si loo go'aamiyo haddii goobta la joogsado ee beddelka ah ee barafka loogu talagalay iyo *wadada barafka loogu talagalay looga baahan yahay in ay xaqijiyaan* ammaanka ardayda iyo dadweynaha. Xaaladaha qaarkood *wadooyinka barafka loogu talagalay dib ayaa looga noqdaa ama wakhtiyada qaarkood wax baa laga beddelaa maalmaha barafku da'ayo. Fadlan halkan ka hubi macluumaaadkaaga la cusboonaysiyyay ee wadooyinka barafka loogu talagalay iyo wakhtiyada, iyo sidoo kale, macluumaaadka la cusboonaysiyyay ee wadada caadiga ah, goobaha basku joogsado, iyo wakhtiyada:*

<https://apps.pps.net/Transportation/BusSchedule/Snow>

Badbaadadu waa muhiimada u weyn inta lagu jiro xaaladaha hawadu xumaato.

Xaaladaha Kala Duwan Ee Hawada Xumaata Ee PPS

FURITAANKA CAADIGA AHAA OO LA ADEEGSANAYO WADOORYIN BARAFKA LOOGU TALAGALAY

	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEXAN
1a	Furitaanka Caadiga ah ee PPS. Dugsivo gaar ah ayaa isticmaalaaya wadooyinka bafarka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> Ardaydu waxay imanayaan wakhtigii caadiga ahaa Dhammaan dhismayaasha PPS way furan yihiin. Adeaga baska ee dugsivo gaar ah ayaa isticmaalaaya wadooyinka bafarka loogu talagalay Barnaamijaya dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan .
1b	Furitaanka Caadiga ah ee PPS. Dhammaan basasku waxay isticmaalaayaan wadooyinka bafarka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> Ardaydu waxay imanayaan wakhtigii caadiga ahaa Dhammaan dhismayaasha PPS way furan yihiin. Dhammaan basasku waxay isticmaalaayaan wadooyinka bafarka loogu talagalay. Barnaamijaya dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan .

2 SAACADOD AYAA DIB LOO DHIGAY FURITAANKA

	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEXAN
2a	Dugsivo gaar ah oo ay leedahay PPS ayaa 2 saacadood dib loo dhigay. Dhammaan basasku waxay isticmaalaayaan wadooyinka bafarka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda dhigata dugsivo gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa. Dhammaan dhismayaasha PPS way furan yihiin. Dhammaan basasku waxay isticmaalaayaan wadooyinka bafarka loogu talagalay. Ku dejintii wakhti hore lagu dejinay ardayda ee dugsiga daryeelka carruuta waa la baajiyay. Dugsiga barbaarinta carruuta “Kindergarten” ee SUBAXDII waa la baajiyay. Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado wa la baajiyay. Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya. Barnaamijaya dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay ee dugsiyada furani waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.
2b	OR Dhammaan PPS ayaa 2 saacadood dib loo dhigay. Dhammaan basasku waxay isticmaalaayaan wadooyinka bafarka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda dhigata dugsivo gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa. Dhammaan dhismayaasha PPS way furan yihiin. Dhammaan basasku waxay isticmaalaayaan wadooyinka bafarka loogu talagalay. Ku dejintii wakhti hore lagu dejinay ardayda ee dugsiga daryeelka carruuta waa la baajiyay. Dugsiga barbaarinta carruuta “Kindergarten” ee SUBAXDII waa la baajiyay. Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado wa la baajiyay. Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya. Barnaamijaya dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay ee dugsiyada furani waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.
2c	Dugsivo gaar ah oo ay leedahay PPS ayaa 2 saacadood dib loo dhigay.	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda dhigata dugsivo gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa. Dhammaan dhismayaasha PPS way furan yihiin. Ku dejintii wakhti hore lagu dejinay ardayda ee dugsiga daryeelka carruuta waa la baajiyay. Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado wa la baajiyay. Dugsiga barbaarinta carruuta “Kindergarten” ee SUBAXDII waa la baajiyay. Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya. Barnaamijaya dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay ee dugsiyada furani waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.
2d	OR Dhammaan PPS ayaa 2 saacadood dib loo dhigay.	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda dhigata dugsivo gaar ah ama dhammaan dugsiyadu waxay yimaadaan (2) saacadood ka dib marka loo eego wakhtigii caadiga ahaa. Dhammaan dhismayaasha PPS way furan yihiin. Ku dejintii wakhti hore lagu dejinay ardayda ee dugsiga daryeelka carruuta waa la baajiyay. Fasalada dugsiga AXADA ee SUBAXDII la aado wa la baajiyay. Dugsiga barbaarinta carruuta “Kindergarten” ee SUBAXDII waa la baajiyay. Fasalada maalinta nuskeed iyo bartamaha maalintii la dhigto waxay shaqaynaan iyadoo aanay jirin gaadiid dugsiga kuu qaadaya. Barnaamijaya dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay ee dugsiyada furani waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.

XIRITAANKA

	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEXAN
3a	Dugsivo gaar ah oo ay leedahay PPS way xiran yihiin. Dhammaan basasku waxay isticmaalaayaan wadooyinka bafarka loogu talagalay.	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda ka socota dugsivo gaar ah guriga ayay iska joogaan. Dhismayaal gaar ah oo dugsiga ka tirsan ayaa xiran. Dhammaan basasku waxay isticmaalaayaan wadooyinka bafarka loogu talagalay. Barnaamijaya dugsiga ka dib iyo maalinta la kordhiyay ee dugsiyada furani waxay shaqaynayaan gaadiid la'aan.
3b	Dugsivo gaar ah oo ay leedahay PPS way xiran yihiin.	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda ka socota dugsivo gaar ah guriga ayay iska joogaan. Dhismayaal gaar ah oo dugsiga ka tirsan ayaa xiran.
3c	Dugsiyada PPS way xiran yihiin. Xafisiyadu way furan yihiin	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda guriga ayay iska joogaan. Dhammaan dhismayaasha dugsiga way xiran yihiin. Xafisika dhexe ayaa furan. Rice wuu furan yahay. Gaadiidku way furan yihiin
3d	Dhammaan PPS way xiran yihiin.	<ul style="list-style-type: none"> Ardayda guriga ayay iska joogaan. Dhammaan dhismayaasha dugsiga way xiran yihiin. Xafisiyadu way furan yihiin.

HAWLAHA GALABTII LOOGU TALAGALAY IYO DHACDOOYINKA WAA LA BAAJIYAY.

	FARIINTA WARBAAHINTA	FARIIN QEEXAN
4	Hawlaho galabtii loogu talagalay ee PPS iyo dhacdooyinka waa la baajiyay.	<ul style="list-style-type: none"> Dhammaan hawlaho galabtii loogu talagalay, dhacdooyinka, iyo tababarada PPS waa la baajiyay. Fasalada fiidkii la dhigto ee lagu qabto dhismaha Benson waa la baajiyay.